

Waa Maxay! Sidey U Shaqaysaa!

GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA EE MAINE:
WAA MAXAY?

Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Maine waa wakaalad gobalka ah xukunta waajibaadka meel marinta shuruucda takoorid diididda ee Maine. Waxaan helnaa oon baadhnaa cabashooyinka ah takooridda sharci darrada ee shaqaalaysiinta, guri dagidda, wax-barashada, helidda hoy dadwayne, iyo cusboonaysiinta dayn. Waxaan isku daynaa inaan xallino cabashooyinkan ee kala xaajoodka dhamaan kuwa ku lug lahaa. Waxaan dooni karnaa in aan geyno maxkamadda marka xalalka kale lagu guul daraysto.

TAKOORIDDA WAXAA LAGU QEEXAA:

- 1. Takoorid Cad – ula kac ah, ficil takoorid oo buuxa;
 - 2. La Dhaqan Kala Qaybsan ama Kala Duwan – ula dhaqmidda xubnaha qaybaha la dhawray kala duwanaan iyo xurmayn ka yar xubnaha ay isku xaaladda yihiin ee kooxda oo dhan. Cadayn takoorid ayaa loo baahanyahay.
 - 3. Saamayn Kala Duwid – fullin taasoo, xataa saamaysa dhamaantood, waxay leedahay saamayn lid ku ah xubnaha qaybta la dhawray marka la barbar dhigo saamaynta xubnaha qaybta wayn. Ujeedada ama sababtu waa malahan maxsuul.
- NIDAAMKA BAADHIDDA

DHEXDHEXAADIN: Baadhayaasha Golaha Xuquuqda Aadanaha ee Maine waxay u aruuriyaan xogta qaab dhexdhexaadin. Golahu waxay ku salaysanyihiin go’aanadiisa xaqiiqada iyo cadaymaha. Haddii Goluhu helo arrimo macquul ah in la rumaysto in takoorid sharci-darro ah dhacday, hadaba waxay u istaagtaa qofka keenay dacwadda dadaalada ee sida caadiga ah lagu xallinayo arrinta iyo, haddii ay muhiim tahay, Maxkamadda Sare kharash la’aan dacwadda.

Xallinta: Xeerka Xuquuqda Aadnaha ee Maine wuxuu dhiirro galiyaa xallinta caadiga ah ee dhamaan dacwadaha la keenay.

XEERKA XUQUUQDA AADANAHA EE MAINE:

Ma ahan dhamaan takooriddu sharci-darro. Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine wuxuu ka dhiga sharci-darro in la takooro kuwa soo socda ee sababaha soo socda:

SHAQAALAYSIIIN: arrimaha ku salaysan farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, naafo muuq ama maskax ah, firsi hido, diin, da’da, duriyad ama qolo. Sidoo kale, sababtu waxaa weeye dacwad keenidda ama sheegashada xuquuqda ee Xeerka Xaqsiinta Shaqaale, ama aargoosiga ee Xeerka Fashilinta.

GURI DAGIDDA: arrimaha ku salaysan farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, naafo muuq ama maskax ah, fir qoys, diin, duriyad, qolo, ama ah helaha kaalmada fadaraalka, gobal, ama kaalmada heer deegaan.

WAX-BARASHADA: arrimaha ku salaysan sinji, xidhiidh galmo, naafo muuq ama maskax ah, qolo, ama farac.

HELIDDA HOYGA DADWAYNE: arrimo ku salaysan farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, naafo muuq ama maskax ah, diin, duriyad ama qolo, (dagidda caruur darteed).

DAYN QAADASHADA: kali ah arrimaha ku salaysan da’da, farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, xaalad guur, diin, duriyad ama qolo.

AARGOOSI: Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu mabnuuca aargoosiga ee qof kasta kaasoo looga soo horjeedo ficil kasta kaasoo jabinaya Xeerka, ama maadaama oo shakhsigu dacwad sameeyay, marag furay ama hanaan kastaba u caawiyay baadhid kasta, dacwad gudbin ama dhagaysiga ee Xeerka.



Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine
Dirid: 51 State House Station, Augusta,
Maine 04333-0051

Street Address: 19 Union Street

Taleefoon: (207) 624-6290
TTY: Maine Relay 711
Faakis (207) 624-8729

Websayd: www.maine.gov/mhrc

XEERKA XUQUUQDA
AADANAHA EE MAINE

SHAQAALAYSIIIN

GURI DAGIDDA

WAX-BARASHADA

HELIDDA HOYGA DADWAYNE

DAYN QAADASHADA

Waa Maxay
Sidey U Shaqaysaa

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine
AMY SNEIRSON, EXECUTIVE DIRECTOR

www.maine.gov/mhrc

HANAANKA QABASHADA DACWADDA TAKOORIDDA

